

TILMAAMAHA KALA SOOCIDA QASHINKA

Marka aanad hubin bacda lagu ridayo qashinka, waxa aad ku ridaa bacda qashinka hadhaaga ah

WARAAQAHA

· karatoonta jilicsan · wargeysyada iyo buugta · waraaqaha qoraalka · xayeysiiska boosta ee alaab ku jirin · karatoonta badarka lagu quraacdo · karatoonta ukunta · karatoonta saabuunta dharka · karatoonta biisaha · karatoonta kabaha · karatoonta fudud ee kale.

FIIRO GAAR AH! Xabagta darteed waa in baqshadaha lagu dari qashinka hadhaaga ah. Halkan waxad u tuuri kartaa karatoonta fudud laakiin kuma tuuri kartid karatoonta cabitaannada. Karatoonta hirarka leh ha ku tuuri halkan.



BAC GUDUUDAN/CAS

KARATOONTA CABITAANKA

Dhammaan karatoonta fudud ee la nadiifiyey · karatoonta cabitaanka · karatoonta caanaha iyo cabitaanka · karatoonta daadi iyo sooska

FIIRO GAAR AH! Karatoonta adag ee aan gelayn bacda waxa la keeni kara amid ka mid ah saldhigyada qashinka ama waxa la dhigi karaa dukaanka. Ogow, waa karatoonta cabitaanka oo keliya.



BAC LIIN AH/ MIDAB ORANJO AH

QASHINKA HADHAAGA AH

Xasuuso inaad rogtid bacda!

Qashinka aan lagu ridi karin bacaha kale: · xafaayado · caag wasakh ah · karatoon wasakh ah · waraaqaha hadyadaha · baqshadaha · alaabta caag ka samaysan · bacda huufalka · alaabta ka samaysan galaaska iyo dhoobada ee si fiican loo xidhxidhay iyo waxa la mid ah

FIIRO GAAR AH! Dambasku waa inuu qaboow yahay oo lagu xidhay 3 bacood oo si fiican u xidhan. Alaabta korontada kuu shaqaysa – eeg qashinka alaabta korontada ku shaqaysa.



BAC CAD

QASHINKA CUNTADA

· hambada qadada · qudaarta · qolofita ukunta · burka/daqiiqda iyo alaabta wax lagu dubo · shaaha bacda ku xidhan · shaandhada kafeega · cuntada caanaha ka samaysan · waraaqaha qalajinta iyo karatoonta ukunta oo badneyn · ubaxyo aan badneyn

FIIRO GAAR AH! Caag ama qashinka beerta ha ku darin qashinka cuntada.



BAC CAGAAR AH

BALAASTIKADA

Dhammaan balaastikada wax lagu baakadeeyo: · fooliyada · bacaha · caagadaha · kiliyada · koobab · daasadaha · bacaha kafeega

FIIRO GAAR AH! Biyo qabow ku dhaqdhaq baakada – ka tuur hadhaaga cuntada. Cayaraha ka samaysan balaastikada, cadayga ilkaha iyo alaabaha kale ee balaastikada ka samaysan laguma ridayo bacdan. Bolistireen (Isopor) waxa lagu darayaa bacda qashinka hadhaaga ah



BAC BULUUC AH

BAAKADAHA KA SAMAYSAN GALAASKA IYO BIR



Kontaynaro ayaa yaala meelo kala duwan oo ka tirsan degmada · quraaradaha aan la celin · quraarada jaamta iyo waxa la midka ah · quraaradaha dawada ee madhan · dhammaan noocyada birta wax lagu baakadeeyo (daasadaha, birta lagu tuujiyo kafiyaarka iyo waxyaalaha la midka ah.)

FIIRO GAAR AH! Galaaska baabuur iyo galaaska biruhu ku jiraan maaha baakado galaas ah oo waa in toos loo keeno saldhigyada qashinka ee shaqaaluhu joogaan.

QASHINKA QALABKA KORONTADA KU SHAQAYSAA



Qalabka ku shaqeeya korontada ama elektorooniga ah sida kombuutaro, qabooyiso, shaashadaha telefeeshanka/kombuutarka waxa si bilaash ah loo geyn karaa dukaannada gada alaabta noocaas ah ama waxa toos loo geyn karaa goobaha qashinka la geeyo ee Remiks (Returstasjoner). Qashinka qalabka korontada iyo elektorooniga waxa iyana ka mid ah: · ciyaaraha elektorooniga ah · guluubyada nalalka nooc kasta · telefoonnada moobaylka ah · mashiinka timojarista · timoqalajiyaha · kabaha carruurta ee nalka leh · iyo waxyaalaha la midka ah.

QASHINKA BEERTA



Qashinka beeraha waxa loo kala saaraa labo qaybood. Qaybta 1-aad: Qoryaha, laamaha, baarka, gunta iyo xididada oo dhexroorkoodu yahay ilaa 30 sentimitir waxa la geynayaa Saldhigga Qashin-celinta (Returstasjonen) ee Remiks Miljøpark. Xididdadu waa inay nadiif ka ahaadaan ciid iyo dhagxo. Qaybta 2-aad: Cawska, ajada, caleen, ciid, niis iyo dhagxaanta yaryar oo iyana la keeni karo, laakiin waa in laga reebo wixii lagu soo baakadeeyey markii la soo qaadey (tusaale ahaan caagaga lagu rido ubaxyada, bacaha iwm.)

ALAABTA GURIGA



Alaabaha dib loo isticmaali karo iyo waxa la geyn karaa Miljøbutikken oo ku yaala Remiks Miljøpark ama dukaan kale oo gada alaabta duuga ah. Waxyaalaha aan dib loo isticmaali karin waxa la geynayaa in ka mid ah saldhigyada qashinka ee shaqaaluhu joogaan.

QASHINKA HALISTA AH



Waxa too loo geynayaa Saldhigyada qashinka (Returstasjoner) ee Remiks: · rinjiga · xabagta · khafiifiyaha · saliid · tuubada nalka ah · guluubyada korontada tashiila · daawooyinka nadiifinta · batariga baabuurta · batariga moobilada · battariyada guluuska u eeg · daasadaha buufinta ee gaasta ku shaqeeya · materiyaal la dhigo dhulka · albaabada garaashka oo la geliyey qabow-celiye · dariishadada ka samaysan PCB iyo waxyaalaha la midka ah.

Daasadaha rinjigu ee madhan ama uu rinjigu ku qalalay oo loo yaqaano «kuwa madhan iyo kuwa qalalan» waxa loo geynayaa mid ka mid ah Saldhigyada (Returstasjoner) Remiks.

FIIRO GAAR AH! Adeegso baakado daloolin oo asal ah. Haddii la adeegsanayo baakado kale waa in si cad loo calaamadiyo waxa ku jira.

QASHINKA HALISTA KEENI KARA



Irbadaha talaalka waxa caadi ahaan la geeyaa rugaha dhakhtarada ama xarumaha caafimaadka carruurta. Remiks waxay gudoomaysaa keliya irbadaha lagu soo riday baakado xidhan oo la aqoonsanyahay. Daawooyinka waxa la geyn karaa farmasiyada ama dhakhtarada/xarumaha caafimaadka carruurta. Remiks way gudoontaa bakhtiga xayawaanka laakiin waxa la geyn karaa keliya rugta ku taala nordøya.

SALDHIGYADA QASHINKA LA KEENO

SALDHIGYADA QASHINKA LA KEENO



Tromsøya

GALAASKA / BIRAHA

- Coop Prix Håpet, WC-vegen 86
- Coop Prix Myreng, Myrengvegen 42 / 46
- Coop Prix Stakkevollan, Utsikten parkeringsplass (baarkinga)
- Extra Bjerkaker, Strandvegen 140
- Extra Elverhøy, Gitta Jønssons vei 2
- Extra Hamna, Ringveien
- Extra, Stakkevollvegen 321
- Fagereng, barbarka xabaalaha
- Hjalmar Johansens gate 45
- Høyblokka Åsgårdvegen, Åsgårdvegen 9
- Kiwi Hamna, Årevegen
- Kvaløyvegen 103
- Prestvannet Studenhjem, (E-blokka), Olastien 15
- Rema 1000 Lanes, Strandvegen 106
- Remiks Miljøpark, Ringvegen 180
- Rødhettestien, Rødhettestien 7
- Statoil, Fridtjof Nansens plass
- Studentboligene
- Studentsamskipnaden, Ørnevegen, barbarka doobiga
- Tunvegen, barbarka boosaha
- Universitetet, MH-bygget

Fastlandet

GALAASKA / BIRAHA

- Amfi Pyramiden, Tromsdalen
- Andersdalen ved Fosbakken
- Coop Marked Lakselvbukt
- Eurospar Tromsdalen, Anton Jakobsens veg 1
- Fagernes, barbarka Ramfjord Handel
- Kroken forretningssenter
- Kyrre Westerlund, Sjursnes
- Olderbakken skole, Sørfjorden i Ullsfjord
- Oldervik, mellom Nærkjøp og pumpestasjonen
- Tomasjordneset, barbarka Eurospar
- Vikran båthavn, Vikran

Kvaløya

GALAASKA / BIRAHA

- Austein Handel, Brensholmen
- Eide Handel, Eidkjosen
- Johs. Johansen, Kvaløyvågen
- Kattfjord skole, Kattfjord
- Larseng barbark storkiosken
- Rimi Storelva, Storelva
- Slettatorget
- Vengsøy fergekai, Vengsøy

Karlsøy

GALAASKA / BIRAHA

- Hansnes, Ringvassøy
- Hessfjord barbarka kontaynarka qashinka
- Rebbenesøya barbarka kontaynarka qashinka
- Reinøya barbarka halka doonta lagu fuulo
- Skåningsbukta, Vannøya
- Vannareid barbarka iskuulka
- Vannvåg barbarka aqalka degmada

SALDHIGA TROMSØ

ee Remiks Miljøpark, Ringvegen 180

Halkan waxaad keeni kartaa: Qashinka hadhaaga ah · Qashinka beerta · Waraaqaha · Karaatoonta · Looxa/alwaaxa · Alaabta korontada/elektorooniga · Qashinka halista ah · Balaastikada · Qashinka hore loo sii kala saaray · Galaaska · Cuntada · Cuntada baakadaysan · Qashinka halista keeni kara · Qashinka la ridqayo · Biraha



SALDHIGA KARLSØY

HANSNES

Halkan waxaad keeni kartaa: Qashinka hadhaaga ah · Waraaqaha · Karaatoonta · Looxa/alwaaxa · Qashinka beerta · Biraha · Alaabta korontada/elektorooniga · Qashinka halista ah · Galaaska

SKÅNINGSBUKT

Halkan waxaad keeni kartaa: Qashinka hadhaaga ah · Waraaqaha · Karaatoonta · Looxa/alwaaxa · Qashinka beerta · Biraha · Alaabta korontada/elektorooniga · Qashinka halista ah



SUUFAFKA

Waxa goobaha Remiks intooda badan la dhigay armaajooyinka suufafka/dharka. Labo shirkadood ayaa fuliya adeegaas. Waa UFF iyo Fretex. Labadan shirkadood waxa iyana armaajooyin dhar oo kale dhigeen meelo kale oo ka mid ah degmada.

www.uffnorge.org

www.fretex.no

